# Golaha Wakiilladda

## Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka

### *Golihii 5^aad ee Wakiillada, Kal-fadhiga 8^aad Fadhigiisii 12^aad*

***Wakhtiga 10:30* AM** ilaa **12:38 Am**
***Taariikhda: - 03 July 2024***

**Gudoonka: -** Md. Yaasiim Maxamuud Xiir (Faratoon)

**Quranka: -** Md. Sh. Siciid Sokeeye

**Ajandaha Fadhiga:** - Warbixinta Gudoomiyaha Hay'addaha Sh. Dawlada ee Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta

**Md. Khaalid Gudoomiyaha Hay`ada shaqaalaha:-** Bimilaahi Raxmaani Raxiim, xubnaha shirgudoonka ee Gollaha wakiillada iyo saxaafada waxaan idinku salaamayaa salaaanta islaamka ASC. Mudanayaal runtii waxaan idinka mahadcelinayaa Doodii aad galiseen Xeerka Hawl-gabka iyo xaqsiinta shaqaalaha Dawlada, oo aan dhagaystay oo aan jeclahay wixii iiga baxay in aan idinla wadaago sidoo kale meelaha qaarna aan bayaamiyo muhiimada iyo ahmiyada uu leeyahay Xeerka Hawl-gabka iyo xaqsiinta shaqaalaha Dawlada oo ay xukuumadu curisay, Hay`ada shaqaaluhuna ay ka ahayd gadhwadeen xeerkaasi qabyo-qoraalkii xeerkaa ee idin soo gaadhay oo aad runtii soo wada akhrideen.

Mahad naqa ka sakaw waxaan si gaar ah ugu mahadnaqayaa Guddiga arrimaha Bulshada oo iyadu si gaar ah xeerkan nagala shaqaynaysay, mudo farabadana runtii Hay`ad shaqaale ka ahaana aanu usoo jeedinaynay muhiimada uu Xeerkani leeyahay iyaguna sida ay Golle waynaha ay ugu soo jeediyaan muhiimada uu Xeerkani leeyahay markaa Gudoomiyaha iyo Guddigiisa aad baan ugu mahad naqayaa iyo shaqaalihii Gollaha wakiilada ee la shaqaynayayba.

Markaad eegto Xeeka oo runtii ka kooban 8 Cutub iyo 72 Qodob waxa uu si guud uga hadlayaa Hawl-gabka iyo xaqsiinta shaqaalaha waxa uu Xeerkani ku xidhan yahay Xeerkii shaqaalaha Dawlada ee aad idinku ansixiseen oo runtii waajibinayay in- ay Hay`ada shaqaaluhu ay samayso Habraacyo iyo Xeerka Hawl-gabka iyo xaqsiinta shaqaalaha Qaranka gaar ahaan shaqaalaha Dawlada iyo runtii siyaasadihii iyo habraacyadii ka dhalanayay markaa Xeerku ahmiyada uu leeyahay markaad eegto, Qodobada ugu muhiimsan ayaan dul- istaagi doonaa oo aan isleeyahay Xeerkani waxa uu u baahan yahay Bayaamin iyo iftiimin.

Xeerku waxa kale uu dhisayaa Hay`adii maamuli lahayd Hawl-gabka iyo xaqsiinta shaqaalaha Qaranka waa markii koobaad ee aynu ka fakarno Nidaamka Haw-gabka iyo xaqsiinta shaqaalaha Dawlada, Hay`ada shaqaalaha Dawladu waxay wadaa dib-uhabayn iyo casri ah oo lagu wado shaqaalaha dawlada oo ku xidhan Refromka kale ee ay wado wasaarada maaliyada oo layidhaahdo Refromka maaliyadeed ee Qaranka waana laba Refrom oo isku xidhan oo iskaaba iminka waxa aanu dhamays tirnay HRM ICE KII waxaan kale oo aanu dhamays tirnay Nidaamkii Derajooyinka iyo qaabaynta mushaharka oo Xeerkii idinku Ansixiseen waajibinayay in lajajabiyo Derajooyinka shaqaalaha  Qaranka.

Xeerku waxa uu abaarayaa Hay`ad maamulaysa Nidaamka Hawl-gabka taas oo noqonaysa mid u xilsaaran ururinta, xisaabinta, Bixinta lacagaha Haw-gabka, xaqsiinta iyo ka midho dhalinta Sanduuqa maalgashiga si waafaqsan Xeerka.

Markaa Xeerkani intaa uu ka hadlayo ee ah ururinta, xisaabinta lacagaha iyo maamulidaba waxay ubaahanaanaysaa fahan guud oo maamul waxay ubaahananaysaa mid maaliyadeed iyo in la ogaado maalgalintaasi waxay tahay in la ogaado in Xeerku runtii uu sheegayo.

Qodobadka aad ugu muhiimsan waxaa ka mid ah Adeegsiga  xeerka ama Xadka adeegsiga xeerka oo sheegaya cida lagu dhaqayaa in ay tahay shaqaalaha Dawlada oo kali yaata markaa waxaan Gadaal ka sharixi doonaa, xidhibaanu badan baa waxay soo jeedinayeen in lagu lamaaneeyo Xeerka Rayidka Xeerka shaqaalaha Dawlada markaa sababta aanu isleenahay isma qaadanayaan ama isma raaci karaan waxaan ka sheegi xaga danbe oo aan ka sharxi doonaa, laakiin xeerkan waxa lagu dhaqayaa maamulka iyo maaraynta arrimha Haw-gabka iyo xaqsiinta ee shaqaalaha dawlada, markaa waxa uu ka reebayaa Xubnaha kala duwan ee uu madaxwaynuhu uu magacaabey iyo qof kasta oo si ku meel gaadh ah loo shaqaalaysiiyay iyo qof kasta oo aan shaqaale dawladeed ahayn.

Xeerkii aad ansixiseen ee shaqaalaha dawladu waxa uu uyaqaan shaqaale dawladeed Agaasimaha guud wixii ka yimaada ama ka hooseeya markaa taasi waa mid adinku Ansixiseen oo xeerkii shaqaalaha ku jirtay, hadaan eegto Xeerku waxa uu dhisayaa Hay`adii maamuli lahayd oo ka kooban Guddiga sare ee sanduuqa Haw-gabka iyo xaqsiinta shaqaalaha Qaranka, oo ay ka midyihiin wasaarado iyo Hay`ado tusaale ahaan, wasiirka wasaarada arrimha Bulshada iyo Qoyska, wasiirka wasaarada Horumarinta maaliyada, wasiirka wasaarada Qorshaynta Horumarinta Qaranka, wasiirka wasaarada Diinta iyo Awqaafta, iyo Gudoomiyaha Hay`ada shaqaalaha Dawlada.

Suaashu waxay noqonaysaa maxaa lagu soo xushay inustituiondan oo aan ubaahanahay in ay xildhibaanado fahmaan in ay tahay, tusaale wasiirka maaliyada waxaa lagu soo xushay maadaama oo laga hadlayo maaliyad ama dhaqaale oo runtii qaadhaan ah oo ay bixinayaan shaqaalaha dawladu, sidoo kalana ay dawladu ku ka bayso qayb ka mid ah dhaqaalaha in markaa la sameeyo Board maamul oo sare halkaa ayuu markaa wasiirku

kasoo galayaa maadaama oo markasta looga maarmayn miisaaniyadii, tusaale ahaan wasiirka arrimaha Bulshada iyo Qoyska iyo  hay`ada shaqaalaha dawladu meelo badan iska kaba markaad eegto xeerkii aad Ansixiseen ee Xeer 31 iyo Xeer 97 labadaba markaa wasiirku waxa uu ka mid yahay Guddiga sare ee maamusha dib u habaynta shaqaalaha waa gudoomiyaha Guddiga maamula dib-uhabaynta shaqaalaha Qaranka markaa asna halkaa ayuu ka soo galayaa, wasiirka  Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranku, maadaama oo la qorshaynayo dhaqaale investment lasamaynayo sido kale la odorosayo dadka galaya beshanerieska noqonaya qorshayntii Qaranka in ay noqdaam muhiimadeeda ayay leedahay oo taas ayay galaysaa, wasiirka Diinta iyo Awqaafta qofka haw-gabka ahi hadii uu Geeriyoodo in ay dhaxlayaan Ehelkiisu gaar ahaan uu sii sheegayo caruurtiisa iyo xaasaskiisa oo tusaale ahaan uu sii sheegayo xaasaskiisu iyaguna inta ay ka dhimanayaan iyaguna in ay iyaguna noqdaan kuwa qaadanaya haw-gab kaas caruurtana Da`a ayuu ku xidhayaa markaa waxaa laga yaabaa qofkii shaqaalaha ahaa inuu dhawr xaas leeyahay una baahan in loo cadaalad sameeyo xaqsiin toodii iyo sida ay u yeelan lahaayeen Diinta iyo Awqaaftu halkaas ayay ka soo galaysaa, Hay`ada shaqaalaha Dawladu waa hay`adii shaqaalaha maamulaysay markaa muhiimada uu Bordku ku fadhiyo iskama iman ee wuxuu ka yimi xisaab iyo daraasad lagala tashadey khuburo iyo shaqaale iyo dadka daneeya oo dhan.

Qodobada kale ee aadka u muhiimka ah waxaa ka mid ah magacaabista Agaasimaha sanduuqa maadaama uu Boardku uu maamulayo waxa kale oo ku jira Xeerka in Agaasime guud uu sanduuqu uu yeesho, Agaasimahaasi inuu ku yimaado Qodobka 90aad faqradiisa 3aad ee Daatuurka JSL oo uu madaxwaynuhu uu magacaabo oo Agaasimahaasi uu yeesho shaqaale kasii farcamaya sida Agaasime waaxeedyo sifada uu ku imanayo Agaasimuhu waxaa lala akhriyayaa xeerarka kale ee Qaranka ee muhiimadeeda leh.

Qodobada kale ee muhiimka leh waxaa ka mid ah Qaadhaanka Haw-gabka oo runtii Doodii xildhiibanada markaan eegayay ay muhuum ay tahay percentage fiican qofka shaqaalaha ahi promote garaynayo iyo sidoo kale percetageka ay xukuumadu contribution garaynayso in lays waafajiyo qaab xisaabeed tusaale ahaan mushaharkiisa Aasaasiga ah marka laga hadlayo in 5% ka mid ah Bil walba laga jaro sidoo kale Xukuumaduna ay ku kabto 5% waxay tahay runtii arrin xisaab ku fadhida oo aanu odorosnay oo aanu garanayno oo aanu halkan ka sheegayno 2024 ayaa haw-gab galaya lacagta ay u baahan yihiin waa imisa 2025 imisa qof ayaa haw-gab galaya lacagta loo baahan yahay waa imisa 10ka sano ee soo socda oo dhan 5% ay ka bayso xukuumadu iyo 5% shaqaalaha laga jarayo waxay ku filaanaysaa in la bixiyo qaadhaanka ama muhiimada ay leedahay.

Markaa odoroska aanu samaynay waxa uu ku dhisan yahay qaab- xisaabeed runtii miisaaniyadii Qaranka ee 2025ka aanu qorshaynayno  in la geeyo lacag dhan 1 milyan oo dollar oo ka iminaysa ta noqonaysa lacagta hawl-gabka iyo xaqsiinta shaqaalaha qaranka.

Qodob baa ku jira in mar walba dib loo qiimaynayo sanduuqa haw-gabka iyo xadiga qaadhaanka ah ee shaqaalaha ama dawladu bixinayno Guddi baa dib uqiimaynaysa oo ee gaysa, Guddigaasi waxay ku jaangoynaysaa sixirka iyo Nolol maalmeedka mar kasta jiraya.

Qodobka aad ka muhiimka ah ee ay xildhibaanadu aadka uga doodeen waxa uu ahaa DA`ada uu qofku uu hawl-gabka uu noqonayo, Xeerka waxa ku taal inuu qofku ku haw-gabayo 65 jir markaa 65 kaa anagu iska- maanu keenin ee waxay ka timi Xeerkii aad idinku Ansixiseen ee Xeerkii shaqaalaha Dawlada qaranka, waxa uu sheegayaa in qofka shaqaalaha ah uu ku hawlagabo 65 jir waxaan la akhrinaynaa Xeerkii kan ka horeeyay ee Xildhibaanadii Gollaha wakiiladu ay Ansixiyeen, hal qodob baa ku jiray oo ahaa Xeerkaa hore waxa uu kala qaadayay lab iyo dhadiga ama Raga iyo Dumarka uu xaga da`ada uu ku kala qaadayay laakiin kan waxa aanu ku midaynay oo aan qaadanay da`ada in 65 ku uu noqon doono da`ada lagu Hawl-gabi doono waxa uu xaq uu u leeyahay sida aduunkaba inuu dalban karo “Early retire waxa la yidhaah oo Xeerku uu faah-faahinayo oo uu sheegayo oo muhiimadeeda leh.

Qodobada muhiimka ah ee marka da`da laga hadlayo in aynu xog galino wax aka mid ah da`ada haw-gabka shaqaalaha Qaranku 65 kaasi waxay tahay ta ugu saxsan iyada oo loo eegayo aduuwaynha iyo xaalado farabadan oo aanu qiimaynay, laakin doodii xildhiibanada markaad eegto waa mid umuhiim ah in sababta ay ku timi 65ku ay tahay xeerkii shaqaakaha dawlada qaranka, hadii tan suaalo ay ka imanayso xeerkii kale ee shaqaalaha qaranka maxaa laga yeelayaa markaa Ansaxa ahaa ee Da`ada haw-gabka sheegayay inta ay noqonayso.

Meelaha kale ee muhiimka ah waxaa ka mid ah in aanu qorshaynay sanad kasta in dil loo qiimeeyo sanduuqa haw-gabka qaranka sida uu xeerku sheegayo iyada oo lala eegayo dhaqaalha uu sanduuqaasi uu bixinayo ee uu dadka haw-gabka ah siinayo, ee aanu noqon mid meel taagan ee uu mar kastaba lajaanqaado meceeshada, sixir bararka iyo nolol maalmeedkaba.

Xeerku shaqaalaha waxa uu u leeyahay muhiimad wayn sababta uu ugu leeyahay waxa weeyaan dad faro-badan ayaa runtii hawl-gab noqonaya dadkaasi in ka baxaan oo ay noqdaan Hawl-gab oo uu Qaranku xuso muhiimadeeda ayay leedahay, suaal baa imanaysa Hay`ada shaqaaluhu ma haysaa iminka dad hawl-gab ah oo ay qaadhaankaa ay siiso, jawaabtu waa haa, 297 ka mid ah oo ah dad haw-gab ah ayaa ka mid ah dadka bil kasta ka qaata hay`ada shaqaalaha oo runtii ku yimid sifooyin sida macalimiin, dad ay madaxwaynayaashii hore ay soo galiyeen Buulka hay`ada shaqaalaha Qaranka oo iminka oo aan idila hadlaya jira.

Hadaad eegto xaga hawl-gabka dhaxlayaasha iyo xaqa dhamaadka shaqada xeerku aad buu uga hadlay laakiin xildhibaanadu Qodobada aad umay taaban cida dhaxalka leh iyo

qaabka loogu qaybinayo, waana meelaha aynu isleenahay muhiimad ayay leeyihiin runtiina ay muhiim ay tahay.

Xeerkani runtii maraaxil farbadan ayaa uu  soo maray Qodobada uu ka hadlayoo dhan, waxay tahay in aad mid-mid u dul istaagtaan xildhibaanadii soo akhriyay waxa iiga baxay oo runtii muhiim ah meelaha qaar in ay isku qaldayeen Xeerka shaqaalaha iyo Xeerka Rayidka anagu waxaanu aaminsan nahay in ayna is qaadanayn labo sababoodba Tusaale ahaan hadii Xeer kaliya layskaga dhigo, Anagu iminka waxaan haynaa shaqaalaha dawlada tiradooda, waxaan kale oo aanu haynaa ama aanu ognahay cida hawl-gabka noqonaysa taas anaga oo kasoo dheegayna waxaanu ku  jaangoynaynaa miisaaniyada markaa lagalinayo ee ah miisaaniyada Qaranka, hadii xeerkii aad ku dartaan shaqaalihii Rayidka ahaa shaqaalha sharaaiga u shaqeeya ama kuwa hay`adaha ushaqeeya yaa qaadhaankoodii bixinaya, yaa maamulaya, xagee lagu maamulayaa side loo maamulayaa waxyaabahaa oo dhan waa suaalo ubaahan Tafaasiil intan ka badan oo faahfaahsan oo Gollahan utaala runtii.

Laakiin Xeerka shaqaalaha dawladu uu yahay xeer shaqaale oo gaar ah sidoo kale sidoo kale Xeerka Rayidkuna uu yahay xeer gaar ah oo rayidka loogu tala galay in loo sameeyo shaqaalaha dawlada xeer sanduuq runtii lagu maamulayo xaqsiin tooda iyo hawl-gabkooda mihiimad gaar ah bey leedahay.

Da`da hawl-gabka marka laga tago, qofku hadii uu ushaqaynayay Qaranka wax ka yar 10 sano waxa uu qaadanyaa xaquuqdiisii uu Qaranka ku lahaa isaga oo gaadhay da`dii hawl-gabka xeerkay ku taalaa taa laftirkeeda in aad isla akhridaan baa muhiim ah, qofka xaquuqdiisa iyo qofka hawl-gabka noqonayaa waxa ay ku kala duwan yihiin iyo waxa ay kala qaadanayaan waa labo arrimood oo aad ukala wayn, xildhibaanaduna suaalo badan bey galiyeen arrintaas tusaale ahaan qofku haduu 10 sano wax ka yar shaqeeyo da`dii hawl-gabkana gaadhay waxa loo aqoonsanyaa inuu qofkaasi qaato xaquuqdii uu Qaranka uu ku lahaa, oo loo xisaabiyo intii sano ee uu shaqaynayay oo loogu dhufto intii bil kasta mushaharkii uu ku shaqaynayay oo uu sidaa uu ku qaato.

Laakiin hadii uu dhaafo 10 sano wax ka badan qofku waxa uu yeelanayaa oo uu da`dii hawl-gabkana uu gaadhay waxa uu xaq uyeelanayaa in uu qaato xaqaa hawl-gabka da`da ayaa markaa laga soo eegayaa, qofbaa 20 sano ku hawlgabaya qofna 30 sano ayuu ku hawlgabi karaa oo marka laga eegayo da`da 65jirka marka uu gaadho tusale ahaan 30 sano qof Qaranka u shaqaynayay oo da`dii hawl-gabka gaadhay baa hawl-gabkii galaya qof 2 sano ushaqaynayay kaba soo qaad isaga oo 63 jir ah hadii shaqada la qoro dhawr sano markuu shaqeeyo waxa uu galayaa da`dii hawl-gabka soo maaha waxay ubaahan tahay arrintaasi xisaab, formulooyin markaa ku dhisan xeerkani markaa uu sheegay oo uu jideeyay, waa sabata Guoomiye ku-xigeenka iyo Agaasimaha waaxda haw-gabka iyo

lataliyaha hay`ada shaqaaluhuba ay runtii in badan ay usoo daraasaynayeen xisaab ahaan qaabka ay ufadhido hawshaasi.

Markaa runtii waxaan idinku boorinayaa Xeerkani muhiimadaa leeyahay in la ansixiyo waxaan kale oo aan idinku boorinayaa muhiimadaa uu leeyahay in looga Doodo si scientific ah oo Qodob- Qodob aad u eegtaan oo runtii meelaha kaabista ah lakabo, xildhibaanada hadaan Doodoodii aan dul maro labada Qodob ee kala ha Agaasime guud iyo Agaasime fulineed ayuu ka hadlayaa ayay yidhaahdeen, Xeerku waxa uu ka hadlayaa Agaasime guud oo uu madaxwaynuhu magacaabo oo leh dhamaan qaab-dhismeedkii iyo haykalkii sanduuqaa lagu maamulayay.

Shaqaalaha Haw-gabka noqonaya sanadada soo socda waxaan kasoo dheegnay HRM kayaga si fududna waanu ku heli karnaa anagu waxaan naqaanaa sanadka 2024ka waxaa galaya 1517 Qof sanadka 2025ka waxaa galaya 1821 Qof, 2026ka waxaa galaya 2033 Qof , 2027ka waxaa galaya 2400 garaafku wuu socdaa marka lagaadho sanadka 2045ka waxaa kala badanaya lacagtii ay dawladu ay bixinaysay iyo lacgtii uu qofka shaqaalaha ahi uu bixinayay iyo dadka haw-gabka noqonaya wey kala badanayaan marka waana halka marka loo baahan yahay indhaqaalaha la investment gareeyo maalgalintaaa sida loo maamulayaana waxa ay ku taala Xeerka oo runtii Qodob-Qodob usharaxaya dhaqaalahaa cidda maamulaysa meelaha la maalgalinayo, sida loo maalgalinayo, maalgalintaa sida loo isticmaamalyo, maalgalintaasi waa ta lagu kabayo Dakhliga markaa aynu ubaahanahay sanooyinkaa aan sheegay.

Xeerku waa xeer runtii faah-faahsan oo aanu runtii Gollaha ka codsanayno maadaama uu muhiimad wayn uu u leeyahay shaqaale waynaha Qaranka in ay Ansixiyaan, Tusaale ahaan xildhibaanada qaar waxa ay soo jeedinayeen in number badan oo shaqaale ah ay ka baxayaan meesha oo ay tahay in xeerka lagu soo begin ee dib loo dhigo, suaashu waxay noqonaysaa qofkii da`da haw-gabka gaadhay ee xuquuqdii xeerkii shaqaalaha ee aad idinku Ansixiseen sidoo kale shaqadaasi aad udirteen hay`ada shaqaalaha in ay soo diyaariso Xeer Nidaamiyaashii ka dhalanayay waxay u baahan tahay maamul keedii iyo Nidaamkeedii in aynu dhisno oo la habeeyo oo runtii sifoojigan laga dhigo.

Xeerku waxa uu muhiimad gaar ah siinayaa Dadka laxaadka la`a ama Dadka shaqada ku naafooba, sidoo kale waxa uu muhiimad wayn siinayaa Dadka Naafada oo uu Xeerku si guud uu u sharaxayo, sidoo kale in uu Guddi Caafimaad uu dhisayo oo uu xeerku sharaxayo, Guddigaasi oo qiimaynaysa dadka naafooba ama runtii wax ku noqda shaqada iyo dadka Naafada ah sidoo kale baadhitaano jidheed oo la samaynayo iyo cidda xaqiijinaysa waxaas oo dhan Xeerka ayaa si guud u sheegaya.

Dadka uu sida gaarka uu Xeerku usheegayo waxaa ka mid ah Xaasaska ama caruurta oo runtii muhiimad gaar ah leh qofka shaqaalaha ahi xaq ayuu ku leeyahay Qaranka markaa

caruurtiisa waxa uu kaga saaray Da`da qaan gaadhka marka ay gaadhayaan laakiin xaasaskiisu waxay qaadanayaan hadii uu dhinto mudada iyaguna ay nool yihiin oo dhan.

Arrinta aan xildhibaanada aan runtii aan ku raacsan nahay waxa weeyaan mushaharka shaqaaluhu wuu yar-yahay waana halka nuxurku halka uu ku jiro halkaasi halka laga soo xisaabinayo qofku waa halkaas waana mid waaqic ah oo jira laakiin iminka waxaan qabnaa siyaasada mushahar bixinta iyo derajooyinka oo aanu doonayno in lagu simi mushaharka iyo Derajooyinka sidoo kale aanu doonayno in ay derajooyinku ay noqdaan kuwo cad oo la yaqaano, xeerku waxa uu sheegayaa Tusaale ahaan "A da oo kale waxa uu u kala qaaday A1, ilaa in A9 inta la gaadhsiinayo, Agaasimayaashii guud waxa laga dhigay shaqaale dawladeed markaa waxaan qaadanay A1 iyo A2 in yihiin Agaasimayaal guud Agaasime waaxeedadu waxay iman doonaan categorygiga ka hooseeya ee A6 ama A5 head section ama ku xigeenadu waxa ay iman doonaan A7 ama A9 meela has ayay iman doonaan markaa mushaharka iyo Derajooyinkaa aanu simayno ama aanu qaabaynayno, waxa keeni doona in mustaqbalka in ay ka jawaabto in mushaharkaa yari uu kordho Tusaale ahaan waxaan wadnaa in ay dhaqan gasho miisaaniyada 20225ka miisaaniyada saamayn wayn ayay ku yeelanaysaa markaa oo isbadal oo ah markaa korodhka mushaharka shaqaalaha iyo runtii Gunooyinkoodaba waana arrin aanu isleenahay xal ayay u noqon doontaa mushaharka yare ee runtii imanaya.

Taasina waa mid ubaahan in mustaqbalka anagu aanu masuuliyad gaar ah iska saarno sidii loo midayn lahaa ama loo kordhin lahaa mushaharka shaqaalaha Dawlada arrintaasi muhiimad gaar ah ayay leedahay xeerkuna meelo badan ayuu ku sharaxay xeerkani sidaas ayuu muhiim uu u yahay waxaan diyaar unahay wixii suaal ee aad ka qabtaan in aad na weydiisaan oo aan idiinka jawaabno eek u saabsan Xeerka shaqaalaha dawlada waxaan kale oo si gaar ah ugu mahadnaqayaa shir-gudoonka iyo Guddiga Arrimha bulshda mar labaad oo runtii Iyana dedaal wayn galiyay muddo fara badana isla naaqishaynay Xeerkan waxan kale oo aan si gaar ah ugu mahad celinayaa bahda hay`ada shaqaalaha dawlada oo iyaguna waqti badan galiyay Xeerkan aad ayaad umhadsan tahay.

1. **Md. Axmed Cabdi Ibraahim (Timo-jilic):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim Gudoomiyaha Hay`ada shaqaalaha iyo xildhibaanaduba aad ayay umahadsan yihiin 20245ka marka lagaadho waxaa imanaya in sanduuqii iyo wixii ay kala badanayaan, masoojidin baa jirta in miisaaniyada la kordhiyo mise shaqaalaha wax ku daraya?

2. Hay`adii shaqaalaha oo jirta in hay`ad kale la dhiso iyada oo haysa Recordkii saxda ahaa in hay`ad kale la dhisaa Qaranka maxay usoo kordhinaysaa?

3. Inamo shaqaale ah ayaa jiray oo wasiirkii hore ee qorshayntu uu qoray oo 12 ahaa qaarna waa la shaqo galiyay oo waa labadalay xaquuqda shaqaale ahaan side bey xaq u tahay in qaarna laqaato qaarna la eryo side ayay xaquuq utahay ka hay`ad shaqaale ahaan?

**Jawaab: Gudoomiyaha hay`ada shaqaalaha:** - Xildhibaan aad ayayd umahadsan tahay waanan kaaga mahad celinayaa doodaadii, waanan daawaday xeerka markaad ka doodayseen, waa xarun Xeerka qayb ka mid ah ayaa sheegaya in dib uqiimayn lagu sameeyo sanduuqa, dib uqiimayntaasi waxa weeyaan in sanad kasta la ogaado waayo dhaqaalaha wadanku wuu is badali karaa, mushaharaadkii wuu is badali karaa markaa in sanduuqii dib loo qiimeeyaa muhiimadeeda ayay leedahay dib uqiimayntaasi meelo badan ayay galaysaa in percentage ka dib loo eego in qaadhaanka dawlada waxaa laga yaa in uu gaadho hadii wadanku barwaaqooba 20%.

Suaasha ah hay`ad shaqaale ayaaa jirta maxaa hay`ad kale looga garab samaynayaa jawaabteedu wey fududahay oo waxa weeye Qof kani marka uu hawlgab noqdo waxa uu ka baxay xayndaabkii hay`ada shaqaalaha Qaranka sidoo kale waxa uu ka baxay xeerkii aanu ku maamulaynay ee shaqaalaha Qaranka sido kale waxa uu ka baxay Administrionkii maamulkayaga aanu maamulaynay wuu ka baxay Nidaamkii maamul ee maaliyadeed ee lagu maamulayayna wuu ka baxay markaa waxay ubaahanaanaysaa instiution gaar ah oo maamula dadka hawl- gabka ah waayo anagu shaqaalaha qaranka ayuu xeerku nagu waajibiyay in aanu ka shaqayno, qofkani marka uu Da`da 65 ka uu dhaafo shaqaale Qaran ma aha shaqaalana looma aqoon sanayo, markaa hay`adani waxay noqonaysaa hay`ad maamusha dadkaas, waxay noqonaysaa hay`ad dhaqaale ahaan maalgalin maamusha waayo hay`ada shaqaaluhu maalgalintaa ma maamulayso waxay noqonaysaa hay`ad runtii maamusha jaangoynta iyo odoroska miisaaniyadeed ee isbdalka ku dhacaya Dadka hawl-gabka ah waxa noqonaysaa hay`ad maamusha dadka Naafada laakin mar kasta xidhiidhka ka dhaxaynayaa waxa weeye hay`ada shaqaaluhu marka uu qofku noqdo hawl-gab waxay u gudbinaysaa hay`adaa runtii waana hay`addo iska baya oo wada shaqaynaya waana sababta aan xaga sare ugu sharaxay in ay xubin ka ahaato maamulka sare ee maamulaya hay`adan markaa mar hadii aanu qofkii ahayn shaqaale dawladeed ahayn oo mandate kayagii uu ka baxsan yahy waxay ubaahanaysaa hay`ad maamusha oo Nidaamisa, oo qaabaysa, dhaqaalaha, maamulka iyo Nidaamka lagu soconayo ama jihada uu qaadayo sanduuqaasi.

Suaasha kale waa mid maamul in aynu isla akhrino ducmentiga aad hayso waxaan kugu casuumayaa xafiis kayga waanan kaaga mahad celinayaa runtii arrintaas.

**Md. Qaasim Aadan saleebaan: -** Hay`ada iyo maamulkeeda waan salaamayaa in kasta oo shaqsi ahaan Dacwooyinka ugu badan ay iiga yimaadaan hay`adaasi iyo qaabka ay wax u shaqaalaysiiso, laakiin hadana suaalahayga labo ayaan ku soo koobayaa.

1. Xeerkan waxaa ku jira xaq-siin xeerkan waxaa ku jira dhaxal ma u baahan yahy in la waafajiyo shareecada islaamka oo aynu eegno duruufaha shareeco eek u aadan?
2. Markaad ka hadlaysay 45 sano ka bacdi in ay gaadhi doonaan dadka beitionka noqonaya iyo lacagta kaydka inoo ah taas miyaysan fasiraadeedu noqonayn manta waxaynu joognaa 2024kii 45kana waqti badan oo Gaab ah ayaa udhaxeeya Qaranku shaqaale badan ayuu qoran doonaa shaqaalahaasi ma waxay noqon doonaan shaqaale aad qorshayseen oo aan gaadheen Da`ada 65 ama haw-gabka miyuusan ka 64, 63, 62 jira xaq ulahayn in xiliyadaa la shaqaalaysiiyo ka bacdina dhinacaa tirade ma ka fiiriseen aad leedihiin wey kala badanaysaa labadaa qodob ayaan ku soo koobayaa?

**Jawaab: Gudoomiyaha hay`ada shaqaalaha:** - mudane xildhibaan aad ayaad umahadsan tahay jawaabta hore waa haa waana sababta loogu soo daray wasiirka Diinta iyo Awqaafta in arrimo shareeco marka laga hadlayo ay muhiim ay tahay haday xaq tahay iyo haday tahay hawl-gaba in shareecada loo eego muhiimad gaar ah ayay leedahay waana sababta uu wasiirku uu ugu jiro oo aanan marnaba ka maarmayn maalmahaa marka laga layo in uu marjac ka ahaado.

Waa run wey kala tagayaan 2024 iyo sanadka 20245 ku laakiin xagaynu xogtaa ka keenay, xogta iminka aynu hayno ee shaqaalaha Qaranku waa 30 ilaa iyo 45 da`da ugu badan waa intaas ayay udhaxaysaa markaa sanadkaa marka lagaadho Da`da xogta aanu hayno ayuun baan iminka ka generation garaynaynaa waxaan ka soo qaadaynaa in shaqaalaha Qaranku ay wada noolaanayaan waqtigaa, laakiin odoroska shaqaalaha la qaadanayo, shaqaalaha sanooyinka soo socda galaya maaha taas ee waa da`da aanu iminka hayno cel-celis ahaan iyo xisaabooyin markii la sameeyay sanooyinka soo socda ayaa waxa kala tagaya percentage uu qofku uu bixinayo iyo ka dawladu bixinayso, tirade dadka hawl-gabka galaya noqonaya 8000, ama 9000 noqonaya side lagu heleyaa dhaqaalahaas waxayna ku xidhan tahay suaashii uu xildhibaankii hore uu ina wey diiyay, side loo xisaabinayaa ama loo ogaanayaa, Tusaale ahaan HRMFSM waxa uu sahlayaa in aan ogaan karno bishan soo socota inta haw-gabka galaysa waayo 65 uu xeerkii uu ku jiro in qofkii haw-gab noqonayo bilahan soo socda waxaa laga yaabaa dad aan diwaan galinta ku jirin in ay ku jiraan sanadka soo socda waxaa laga yaabaa in ay tiradu is badesho oo ay runtii dad badan ay galaan hawl-gabka markaa jawaabtu waxay ubaahnaanaysaa arrin farsamo oo maaliyadeed waana sababta uu wasiirka maaliyadu ugu jirayo in la eego dadka haw-gabka noqonaya sanooyinka soo socda iyo waxa la bixinayo sida ay isu waafaqayaan waana sababta xeerka loogu daray in maalgalin la sameeyo tusaale ahaan maalgalintu waxay ka beyaa dhaqaalaha kasoo baxa in sanduuqu haduu kala bato dadkii hawl-gabka noqonayay iyo dhaqaalihii la hayay maalgalin lagu sameeyo oo uu kobco, markaa waxay noqonaysaa arrin mark kasta qiimaynteeda iyo qaabaynteeda ay ka shaqayn doonaan

Guddigaa ay u xilsaaran tahay in sanad kasta sanduuqa dib loo eego la qiimeeyo lala socda iyada oo markaa lala eegayo forecastingka la samaynayo oo wasaarada iyo hay`ad aka imaanaya waad mahad san tahay xildhibaan.

**Md. Maxamed Abiib yuusuf:** - waad mahad san tahay Gudoomiye sidoo kale waxaan umahad celinayaa Gudoomiyaha Hay`ada shaqaalaha in Guddigii sare oo dhan ay noo timaado ayay ahayd, in maalin kasta Gudoomiye kaliya inuu noo yimaado ma ahayn.

1. Tirada guud ee shaqaalaha Qaranku waa imisa, Hay`adaha madax- banaan ee Gollaha wakiiladu ka mid yahay, iyo kuwa ku miishanka, intaa gaar baad noogu sheegaysaa, shaqaalaha kale ee aad maamusho Tiradooda ayaan doonayaa?
2. Waxaan doonayaa sanadkan aad joogto ee 2024 tiradada hawl-gabaysa waa imisa?
3. Boosaska laga hawl-gabo ma isla 2024 ayaad buuxinaysaa?
4. Gudoomiye waxa aan ognahay muddo dhawr iyo labaa tan sano ah ayaa lacag xaq ah oo laga jaro qofka shaqaalaha ah laqaadayay, lacagtaasi Acconunt kee bey ku jirtaa, Tiradeedu waa imisa, waayo qofka waxaa bil kasta laga jaraa 5% dawladuna 5% ayay ku dartaa, lacagtaasi Accountka ay ku jirto Numberkiisa cadad ka ay manta marayso kaana waan doonaynaa?
5. Hay`adaha ay joogaan tirade ugu badan ee Hawl-gabayaa ma Baarlamankaa ma wasaarada Arrimaha Gudahaa?
6. Mashruucii dib uhabaynta shaqaalaha ayaa wali sii socda inta aanu ka war qabno xafiiska aad dhisaysaan Guddigan waxaad Xeerka ku sheegteen in aad maamulaysaan muddo 2 sanadood ah oo ay idin hoos imanayso inta hawshaasi socdo ee mashruucaasi socdo ayaad rabtaa soomaha in aad lacagtaasi aad sii maamushaan oo ay Gacantiina ay ku jirto?
7. Gudoomiye waxaa jira shaqaale badan, waadigan maal-mihii dhawayd macalimiinta qoorta ayaad iskaga duubey xafiisyo badan oo shaqaale qaata ayaa jira oo aanad adigu imtixaankooda qaadin, maxaad ku kala dooratay macalimiinta looga baahan yahay degaano kala duwan oo aad uga dooratay shaqaalaha xafiisyada Hargaysa ka shaqaynaya?

**Jawaab: Gudoomiyaha hay`ada shaqaalaha Dawlada**: - xildhibaan aad ayaad umahad san tahay Gudoomiye- kuxigeenkii Guddigu wuu ila socdaa in aan iskiin baro ayay ahayd suaalaha runtii xeerka ku saabsan, hay`ada shaqaaluhu waxay maamushaa shaqaale waynaha Qaranka, ee ushaqeeya Dawlada waxa kale oo runtii Xeerkii aad Ansixiseen uu madaxbanaani siiyay hay`ado gaar ah oo uu ku tilmaamay hay`adaha dakhli soo saarka sida Baanka, Dawladaha-Hoose, Wakaaladaha Biyaha , Xeerkii shaqaalaha ee aad Ansixiseen ee mudane xildhibaan aan dib kuu xasuusiye ee Gollaha wakiilada kumuu darin shaqaalaheedu inuu hay`ada uu hoos yimaado sidoo kale waxa uu ku lamaaneeyay oo uu ku akhriyay Xeerka waxaa shaqaalaha Baarlamanka lagu maamulayaa Dastuurku

qodobada uu sheegay iyo sidoo kale qodobo Xeer-Hoosaad kiina ka mid ah markaa shaqaalaha Baarlamanka iyo shaqaale farabadan oo sida Bangiga, Dawladaha Hoose, Hay`adaha Dakhli soo saarka sida Wakaaladaha ma hoos yimaadaan hay`ada shaqaalaha Qaranka waxaana sabab u ah Xeerkii shaqaalaha ee halkan ka baxay oo u baahnaa in aad Xeerkaa aad dib u eegtaan oo runttii Amadmad lagu sameeyo.

Buuxinta waan sheegay oo sanadka 2024 ilaa 2045ka waxaan naqaanaa anaga oo eegayna Nidaanka maamul ee lagu maamulo shaqaalaha Qaranka in aanu garanayno shaqaalaha Hawl-gabka noqonaya Tiradooda Tusaale ahaan sanadka 2024 waxaan sheegay 1517 Qof 2028tana waxaan sheegay 2465 markaa waxaad arkaysaa Garaafku inuu kordhayo sanadba sanadka ka danbeeya.

Buuxintaankas shaqaalaha baneeyay 2024 qaabkee ayaa loo raacayaa waxa loo raacayaa sida Xeerku jideeyay xildhibaanka waxaan xasuusinayaa Qodobka 35 ee Xeerkii Baarlaman ee halkan ka baxay oo runtii Qodobkaasi jidaynayo waajibaad hay`ada shaqaaluhu ay qori karto shaqaale hadii ay baahi timaado, sidoo kale in ay maamulayso shaqaalaysiinta, Xaqsiinta, Dalacsiinta, Anshaxmarinta iyo ka war haynta shaqaalaha Qaranka wax aka dhalanaya Xeerkaa oo xeerka shaqaalaha ee aad nagu waajibiseen sheegayaa.

Ma jiro 5% laga gooyo shaqaalaha Qaranka adaa sheegaya halka aad ka keentay.

Hadaad eegto shaqaalaha ugu badan eek a shaqeeya Instiution nada Anagu waxaan maamulnaa ka hay`ad shaqaale ahaan inta uu ka reebay xeerku shaqaalahaasi waa shaqaale ku-kala filiqsan Gobolada iyo degmooyinka, waxa kale oo aan haynaa Derajooyin kooda oo aan sanadkan ka shaqaynayno dhamaantood Derajooyinkaa in lagu jaan-gooyo Derajooyinkii, Xeerarkii, iyo siyaasadihii ka dhalanayay Habraacyada iyo siyaasadaha uu markaa uu sheegay, shaqaalahaasi waxay iskugu jiraan shaqaale jaamacado sanooyinkii udanbeeyay ka baxayay.

**Md. Maxamed Cismaan Maxamed: -** Gudoomiyaha Gollaha wakiilada, iyo Gudoomiye ku-xigeenka mudanayaasha, Gudoomiyah Hay`ada shaqaalaha Asalaamu calaykum warax matulaahi wabarakaato.

1. Mudane Gudoomiye waxaad noo sheegtay in isla sanadkan ba ay jiraan dad haw-gab ah oo lacagta hawl-gabka la siiyo sida aad warbixintaadii ku sheegtay xeerkana ku qoran dee xeerkii wali dhaqan gal ma aha xeerku marka uu dhaqan galo ayaa lacagtii 5% ee shaqaalaha laga goynayayna ay bilaabmaysaa, lacagtii ay dawladu ku ka beysayna ay bilaabmaysaa ee ahayd 5% hada shaqaalaha kuu jooga ee aad hada Tiradooda aad noo sheegatay percent Noocee ah ayay wax ku qaataan ama wax lagu siiyaa?

2. Qofka hawl-gabaa sida Xeerkan ku qoran adiguna aad noo sheegtay mudane Gudoomiye 5% qofka ayaa laga goynayaa mushaharkiisa 5% dawlada ayaa ku kabi doonta qof 10 sano shaqeeyay haday dhaafto oo ay dhawr 10 sano gaadho lacagtii uu kaga qaybqaatayna ay dhamaato ma waxa uu ku soo hadhayaa oo kaliya 5% ee ay dawladu ku ka beysay?
3. Qofka hawl-gabey dadka uu ka tago marka uu Geeriyoodo sida xeerka ku qoran waa 15 jir marka uu ilmaha yari gaadho, ayay go`aysaa lacagtii ilmihiisa la siinayay, laakiin xaasaska qofka hawl-gabay uu ka dhinto sida Xeerka ku qoran waa inta ay nool yihiin, qofka hawl-gabay hadii uu ka tago xaasas ama xaas aad u da`a yar oo 60 sano ama 70 sano ka badan noolaanaya in qaranku uu intaas oo sanadood uu lacag haw-gab ah wado sax miyay tahay?

**Jawaab: Gudoomiyaha hay`ada shaqaalaha Dawlada: -** Mudane xildhibaan waa run oo waxaa jira Tiro 297 oo iminka aanu siino hawl-gab Bil kasta waxayna ku yimaadeen Digrootooyin madaxwayne, oo kasoo bilaabmayay Madaxwayne Daahir Rayaale, oo waliba Tirada ugu badan usoo buul gareeyay hay`ada shaqalaha iyo Madaxwayne Axmed maxamed maxamuud(siilaanyo) oo runtii digrootooyinkaasi sheegayeen oo ay qayaxayeen dadkaasi maadama ay yihiin dad hawl-gab ah in la siiyo, dadkaasi waa dad digrootooyin ku yimi ee ma aha dad hay`ada shaqaaluhu ay keentay ama meel kale ka yimi oo hanaankii hawl-gabka ahaa ee saxda ahaa soo maray oo da`doodii iyo qiimayntii lagu sameeyay maray laakiin waa dad ku yimi Digrootooyin oo markii loo gartay sifooyinkii ay ku madanayeen dadkaasi in ay noqdaan dad haw-gab ah oo in badana gacanta lagu hayay dadkaa in badan oo ka mid ahi hada wey dhinteen laakiin waxa qaata xaasaskoodii, ayaa qaata hawl-gabkaasi waana arrin aan isleeyahay mudo farabadana lagu soo shaqeeyay in dib looga war hayo oo mudnaanta ay tahay.

Hadad eegto kabka xukuumada iyo ka shaqaaluhu ay ka babayaan waa hanaan runtii ku dhisan xisaab oo runtii miisaaniyada Qarankana la jaanqaadaya sidii loogu dari lahaa, laakiin sanadkan maadama 2025kii la hir galinayo hawl-gabkii Qaranka dadka hawl-gabaya looma eegayo ilayn ka qaybqaadasho maysamaynayn percentage lagama goynayn xukuumaduna 5% mey soo dhigayn, waa sababta miisaaniyada Qaranka aan codsanayno in loogu daro odoroskan aanu samaynay ee xisaabta ku dhisan in lacagtaasi ay noqonayso lacagta lagu maamuli doono shaqaalaha markaa galaya hawl-gabka iyo xaqsiinta Qaranka.

Da`ada qaangaadhka caruurta waxa laga soo eegay shareecada laakiin culays bey ku tahay xukuumada runtii xaasaska sii noolaanaya 50 sano ilaa 30 sano ka dib marxuumkii haduu geeriyoodo ama marxuumadii geeriyooto oo runtii culayskaasi wuu jirayaa oo waxa laga eegayaa qofkani xaquuqdii uu Qaranka uu ku lahaa iyo waajibaadkii uu qaranka ku lahaa iyada uu culays badani uu jiro mudada ay noolaanayaan in xukuumadu ay damaanad qaadi doonto lasiin doono xaqaa hawl-gabka ee ay ka dhaxlayaan ee qofkii shaqaalaha ee

Geeriyooday culays wey leedahay laakiin waa mid muhiimadeeda leh oo odoroskiina inoogu jirta miisaaniyada sidoo kale qiyaas ahaan xisaab aanu ku dhisnay ku jirta oo aanan islahayn culays maaliyadeed ayay keenaysaa.

**Md. Saleebaan Axmed carab: -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim shir-gudoonka Gollaha wakiilada, xildhibaanada kooxda uu hogaaminayo Gudoomiyaha Hay`ada shaqaalaha ee la socda waxaan ku salaamayaa salaanta islmaaka Asalaamu calaykum waraxmatulaahi wabara kaato.

1. Shaqaalaha Rayidka kuwooda hawl-gabey halkee ayaynu ku ogaanaa?
2. Xaga da`ada ma xeerkii hore ayaad raacaysaan mise wax kale ayaa la keenayaa?
3. Malaga yaabaa mar hadii da`dii meesha timi in dad badan arrinkaasi xanibo?

Jawaab: Gudoomiyaha hay`ada shaqaalaha Dawlada: - Xildhibaan aad iyo aad baad umahadsan tahay dadkaa waxaan ku ognahay wasaarada arrimaha Bulshada ayaynu ku ognahay xeer 31 ayay ku maamushaa maadaama shaqaalaha Rayidku ay yihiin shaqaale fara badan oo runtii ushaqeeya Hay`adaha caalamiga ah, kuwa maxaliga ah, ushaqeeya dad gaar ah, runtii waxay ubaahan yihiin Nidaam iyo hab gaar ah oo runtii lagu maamulo hawl-gab kooda aduunkana waxa maamula companayniyo ayaa maamula inagu halka aynu ku foognaanayno ee aynu xooga saarayno waa shaqaalihii, miisaaniyadooda inagu maamulaynay, maamul kooda gacanta aynu ku haynay oo ah shaqaalaha dawlada markaa arrintaasi waxay ubaahnaanaysaa Daraasad ka balaadhan, oo Gollaha wakiilada ka balaadhan oo la kaashataan khuburo kale oo caalami ah si hawl-gab ugu sameesaan shaqaalaha Rayidka ah, Tusaale ahaan hadii aad samaysaan Xeerka hawl-gabka shaqaalaha Rayidka ah oo uu Gollaha uu ka baxo waxa waajib ku noqonaya qof kasta oo Rayid ah oo shaqaale ah in Xeerkaa lagu dhaqo, markaa qofkii ushaqaynayay, xaguu ucabanayaa, halkee uu tagayaa, halkee laga maamulayaa, dhaqaalihiisii yaa maamulaya side loo maalgalinayaa waa arrin aynaan ka gayoonayn oo ayna xukuumadu gali ka rayn, markaa sharaaiga gaarka ah percentage ay ku darayaan intee uu nqon  karaa waa arrin ka balaadhan xukuumada.

Laakiin shaqaalaha Dawlada ee inagu gacanta ku hayno in aynu waqti galino sidii aynu ugu samayn lahayn Xeerkan waa talo soo jeedintayadii aanu markaa soo jeedinay.

Xalka da`ada waxaa ugu muhiimsan oo ugu mudan in aynu qaadano da`da aynu soo jeedinay oo waafaqsan Xeerkii hore waayo isma khilaafayaan xeerkan iyo xeerkii hore laakiin hadaad iminka da`da aad bedeshaan oo da`da 70 aad ka dhigtaan side iskula jaanqaadayaan Xeerkii shaqaalaha iyo kani waa suaal idinka idinku soo noqonaysa oo ubaahan farsamo, in aad ujidbixisaan hawshaas, markaa anaga waxay nala tahay oo aan soo jeedinayna in da`dii hore loo daayo oo runtii xeerkii hore ku taala.

Shaqaalaha cusub ma saamaynayo oo runtii wax saamayn ah oo ku yeelanaysaa ma jirto waayo qofka shaqaalaha ee la shaqaalaysiinayo ama kuwii hore ee Nidaamka maray shardiga kobaad waxa weeye inuu haysto, kaadhka dhalashada JSL kaadhkaana waxa ku taaal da`dii, maalinta uu dhashay, Nidaamkii iyo kaadhkii baa isku xidhan waqtiga ama Bisha uu hawl-gabka noqonayo maalinta uu noqonaya ayan garanaynaa qofkaas wax isku xidhan oo is saamaynaya ma aha marka odoroska miisaaniyada laga samaynayo waad mahadsan tahay xildhibaan.

**Md. Maxamed Jaamac Ismaaciil (koodbuur): -** waan salaamayaa aad baanan ugu mahad celinayaa Gudoomiyaha hay`ada shaqaalaha.

1. Waa imisa tirada shaqaalaha dawladu
2. Inta aanu xeerkani dhaqan galin, miyay ahayn in la tayeeyo shaqaalaha mushaharkoodu, uu hooseeyo?
3. Dadka hawl-gabka shaqaalaha galaya Boosaskoodii, side loo soo buuxinayaa, qosaskii dadkaa hawl-gabka galay Tixgalin ma lasiinayaa oo taas ma ku jirtaa qorshihiina?

**Jawaab Gudoomiyaha hay`ada shaqaalaha Dawlada: -** xildhibaan aad ayaad umahadsan tahay Tirada shaluhu waa 26917 Madaxwaynuhuna waakii halkan ka sheegay iyada oo runtii faah-faahsan tiro may ahayn khaldamaysa oo Madaxwaynaha ayaa idiin sheegay.

Waa run oo horena waan usheegay oo shaqaalaha mushaharkoodu wuu hooseeyaa arrintaasi waa arinta aanu gacanta aanu ku hayno ee ah sidii loo qaabayn lahaa Derajooyinkooda iyo mushahar bixinta Qaranka waan kugu raacsanahay xildhibaan maadama oo mushaharka shaqaaluhu ay yar yihiin mustaqbalka in laga fakaro percentageka oo runtii maalgashia la samaynayaa haduu bato wxaa laga yaabaa in la kordhiyo 5% kaa oo dawladuna kordhiso dadkuna ay kordhiyaan, marka fahamka dadku uu kordho eek u aadan hawl-gabka waxaa laga yaabaa marka layidhaahdo 15 % ayaa lagaa jarayaa ama 20 % waxaa laga yaabaa in uu ogolaadaba, oo mushaharka iyo hayntii qofku markay isbadasho taasi waa mid aanu isleenahay mustaqbalka isbadal wayn ayaa ku dhacaya, laakin bar bilowga in aynu samayno xeerkii hawlgabka oo aanu ku dhacno markii koobaad waxay ila tahay in ay tahay arrin muhiimadeeda leh.

**Md. Xirsi Cabdilaahi Xirsi: -** waad mahadsan tahay Gudoomiye waan umahad celinaynaa Gudoomiyaha hay`ada shaqaalaha Gudoomiye khaalid waxaanan isleeyahay Xeerkani waa xeer aad iyo aad u muhiim ah oo kaliya aan muhiim u ahayn dadka haw-gabka galaya ee sidoo kale umuhiim ah dhalin yarada shaqo raadiska ah ee fursada ay ka baxayaan dadka hawl-gabka ahi iyaguna raadinayaan in ay soo galaan.

1. Gudoomiye xeeeku waxa uu sheegayaa dadka Naafada ah la qiimayn doono xaaladooda waxaan doonayaa in aad faah-faahiso hadii qofka ku naafooba shaqada isaga oo ku jira aanu ka raali ahayn inuu haw-gab noqdo kasoo qaad hadii qofku ku indho beelo shaqada dhex deeda laakiin uu doonayo inuu xirfado kale uu barto shaqadiina uu sii wato hawl-gabna aanu galin miyaa lagu khasbayaa qofkaa Naafoobey in uu hawl-gab galo?
2. Waxaa jira dhaqan xaga shaqada ah oo qofka wayni uga bixi karo booska qof uu dhalay oo ka yar hadii uu qofkii ooh awl-gabka kudhaw oo kaba bixi lahaa oo ay d`diisu tahay 64 oo uu wiilkiisa uga baxo shaqada miyuu u ogalaanayaa had aka dib xeerku mise haduu qofku hawl-gabka ku dhawaado waxaa khasab noqonaysa inuu hawl-gabkii galo qofkii uu dhalayna uu qaato xaqaasi?
3. Maadaama uu Dalkeenu korayo mushaharkeenuna insha allah uu wanaagsanan doono hadii qofku manta uu ku hawl-gabo isaga oo 1malyan oo laan ah qaata 10 sano dabaded hadii dadkii A ahaa lacagtoodii ay tagto 10 milyan qofkaa hawl-gabey ma lacagtii uu marka uu ku fadhiistay ayuu haw-gab ka qaadanayaa mise halkay marayaan dadkii la levelka ahaa sanad walba uu ku qaadan doonaa hawlgabka lacagtiisa?

**Jawaab Gudoomiyah hay`ada shaqaalaha Dawlada**: - waxa uu ku qaadanayaa kolba xaalada lagu jiro lama xisaabinayo habkii hore oo waa odoros miisaaniayadeed oo ku dhisan qaab xisaabeed, waana sababta sanduuqa loo yidhi qiimayn halagu sameeyo sanad kasta waayo nolosha ayaa isbadeli kara meceeshada, mushaharka dhaqaalaha wadanka ayaa isbadali kara waxaan rajaynayaa wadanka hadii la ictiraafo miisaaniyadeenuna ay 10 jeer is laban-laabto wuxuuna ku jaan go`an yahay isbadelka mar walba dhacaya, qof manta 200 oo dolar qaadanayay waxaa laga yaabaa 5 sano ka dib in uu 1000 dolar uu qaato percentage ayuun baa la eegayaa ay markaa ka imanayso.

Waa run Cutubka 5aad ayaa waxa uu ka hadlayaa haw-gabka Naafada oo runtii waxa uu aad usharaxayaa Dadka laxaadka beela, qiimaynta Naafanimo sida qofka loo qiimaynayo baadhitaanka lagu samaynayo qofka jidh ahaaneed ee la go`aaminayo xaga haw-gabka Naafada, cida xaqiijinaysa oo runtii Guddi loo xilsaarayo xadiga iyo mudada hawl-gabka qofkaasi uu Naafada ahaanayo ama uu ku jirayo iyo hawsha uu qabanayo, qofka shaqaalaha ah ee isaga oo shaqada ku jira waxa laga yeelayo, waajibaadka ay Guddiga ay ku war celinayaan qofkaasi xeerku aad buu ufaah-faahinayaa, qofku hadii isaga oo naafo hadaanu shaqayn Karin waa damaanad qaad ay Guddigu qaadey.

Xeerku waxyaabaha uu soo ururinayo ayay ka mid tahay maadaama qofkan xaqiisii hawl-gabka la siinayo qof kale oo ehelkiisii ah ugama bixi karo, waayo marka hay`adan aad ansixisaan waxaa la samayn doontaa Datepase ama xog in laga uruuriyo qofka shaqaalaha xaasaskiisa iyo caruurtiisa.

**Md. Axmed Yuusuf Nuur (Guruuje): -** Gudoomiyaha Gollaha wakiilada, xildhibaanada Gollaha wakiilada, Gudoomiyaha hay`ada sahqaalaha saaxiibkay khaalid jaamac Qodax waan salaamayaa.

1. Mudane Gudoomiye dawladnimada halka ugu muhiimsan ayay ka mid tahay hawl-gabku dadkeenana dhawr xaquuqood baa ka lumay, Tusaale ahaan dadkii ENGLISH ka usoo shaqaynayay sanado badan markii ay xoriyadii inaga luntay ayay xaquuqdoodiina ka luntay oo wax xaquuq ah mey qaadan, halka dadkii faranceseska u shaqaynayay ilaa hada ay qaataan, dadkii dawladii Somalia ushaqayn jiray ee in badan soo shaqaynayay Iyana xaquuqdoodii wey luntay manta wax xaquuq shaqaale amah awl-gab oo aynu helnay tanaa ugu horaysa, qofku marka uu shaqada ka baxo muxuu qaadanayaa, tusaale ahaan 2012 kii macalimiin badan oo aan lasabootin baa shaqada laga saaray 10 kun oo dollar bey xukuumadu siisay iyada oo qolyaha qaadhaan bixiyaashu inaga caawinayeen, qofka 40 sano shaqaynay markuu shaqada macasalaameeyo qofkaa maxaa loogu tala galay?
2. Shaqaalaha, A, B ,C,D waxaa wanaagsan in si tayo leh loo eego D,C, in ay qaataan 70% mushaharkoodii waayo marka hore aad ayuu uga yar-yahay B, oo kale 65% laga dhigo A, 50% ha ahato waana dadka ugu wax tarka badan marka la eego, sida waashmaanada, masaxaadaha ee aan marnaba nasanba markaa qof darawal ahaa 60 sanadood oo layidhaah 50% waxaa ila fiican intaa laga kordhiyo.
3. Agaasimaha guud waxa uu leeyahay xaquuq dhamays tiran oo la mid ah qofka shaqaalaha ah ee caadiga ah halka waxaa laga arkayaa in ay saaran tahay waajibaad la mid qofka shaqaalaha ah maadaama xaqa iyo waajibaadku yihiin labo isu dheeli tiran shaqaalaha waxaad ku ilaalisaan in ayna siyaasada iyo xisbiyada ku dhex milmin anigoo amaan idinku soo jeedinayn, hase yeeshee Agaasimayaashu iyaga oo siyaasada dhexbataqsanaya ayaanu aragnaa iyaga maxaad Talaabo uga qaadi wey deen maadaama oo ay shaqaale yihiin?

**Jawaab: Gudoomiyaha hay`ada shaqaalaha Dawlada**: - xildhibaan Guruuje aad ayaad umahadsan tahay Doodaadii Xeerkana waan daawaday waxayna ka mid ahayd doodihii aniga sida gaarka ah iisoo jiitay, mid waan kugu Raacsanahay oo shaqaalaha D,C, mushaharkoodu wuu hooseeyaa laakiin waxanu isleenahay arrinkan waad ku sixi kartaan hanaankan aanu iminka bilaabnay ee ah qaabaynta iyo mushahar bixinta oo aanu is leenahay korodh haku dhaco shaqaalaha uu mushaharkoodu uu hooseeyo eek a hooseeya A,IYO B waayo Derajooyinkii baanu jajabinaynaa sida A1, ilaa A9, B1ilaa B9 25derajo ayay noqonayaan A,B.C.D 25 derajo ayaan ka dhigaynaa waxayna ka yimaadeen Xeerka sahqaalaha Dawlada ee aad Ansixiseen markaa arrintaasi waxay sixi doontaa insha allah war-warkaa anagaba wuu na haystaa shaqaalaha wuu haystaa.

Marka la Ansixiyo Xeerka waxa uu ka bilaabmayaa 15% qof kasta mushaharkiisa oo looma eegayo intii sano ee uu soo shaqeeyay iyo waxyaabahaasi laakiin si guud ayaa marka hore loo wada qaadanayaa, aad baan kaaga mahadnaqayaa Talo soo jeedintaada kale.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| ------------------------------------------------ | ---------------------------------------- |